

UNITED NATIONS



NATIONS UNIES

United Nations Support Office in Somalia
(UNSOS)

CODSIGA MUUJINTA DANEYNTA

Adeegyada Wacyigelinta Bulshada, Maareynta Xafladaha iyo la Shaqeynta Bah-wadaagta

Xafiiska Taageerrada Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOS) waxaa uu halkan Codsiga Muujinta Daneynta ka dalbanayaa shirkadaha u qalma in ay fidiyaan adeegyada Wacyigelinta Bulshada, Maareynta Xafladaha iyo la Shaqeynta Bah-wadaagta, kuwaas oo loogu taageerayo howlaha ay qabtaan Howlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM), Howlgalka Kaalmeynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM), iyo Xafiiska Taageerrada Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOS).

AU/UN IST waxaa ay la shaqeyaan warbaahinta maxalliga ah, kuwa gobolka iyo kuwa caalamiga ahba iyaga oo fududeeya helitaanka weriyeyaasha iyo dadka arrimaha ka faallooda, isla markana wadaago sawirro, muuqaallo iyo macluumaadka dadweynaha, iyada oo si weyn diiradda loo saarayo sidii isbeddel wanaagsan lagu sameyn lahaa aragtiyada dadka ee ku aaddan ajendooyin wanaagsan. Ujeeddada ay AU/UN IST leeyihiin waxaa ay tahay in la sameeyo wacyigelin ku aaddan waajibaadka hay'adaha xilli ay dadaal ugu jiraan in ay ka caawiyaan Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya (DFS) iyo shacabka Soomaaliyeed in ay dhisaan Soomaaliya oo xasilloon, nabad ah isla markana barwaaqo ah, oo ku dhisan dhowrista ku dhaqanka sharciga, caadooyinka, dhaqanka iyo mabaaddii'da ummadda Soomaaliyeed.

Qandaraaslaha ku guuleysta waxaa uu sidaa daraaddeed fidin doonaa adeegyada Wacyigelinta Bulshada, Maareynta Xafladaha, La Shaqeynta Bah-wadaagta kuwaas oo lagu taageerayo hadafyada mashruucyada kor ku xusan ee AU/UN IST

UNSOS waxaa ay dooneysaa in ay gasho heshiis hordhac ah muddo hal sano ah (1) iyada oo ay laga yaabo in muddada la kordhiyo labo mar (2) oo kale oo min hal sano ah (1+1+1), taasi oo ku xiran in UNSOS ay ku qanacdo hufnaanta waxqabadka shirkadda. Muddada ay soconeyso howl waliba oo seddax biloodba kaddib mar la soo diro, waa seddax toddobaad (21 maalmood) ee inta lagu guda jiro sanadka uu socdo heshiiska.

Howlaha waxaa laga fulinayaa qaybaha soo socdo ee guud ahaan Soomaaliya iyo goobaha kale ee ay hay'aduhu codsadaan:

Qaybta 1-aad: Muqdisho, Afgooye, Marka, Baraawe, Qoryooley

Qaybta 2-aad: Dhoobley, Afmadow

Qaybta 3-aad: Baidhabo, Xuddur, Buurhakaba, Diinsoor

Qaybta 4-aad: Beledweyne, Jalalaqsi, Maxaas, Buula Burde

Qaybta 5-aad: Jowhar, Balcad, Mahaday, Biyo Cadde

Qaybta 6-aad: Kismaayo

Qandaraaslaha waxaa uu magacabaai doonaa Maareeye Mashruuc oo Maxalli ah kaas oo si jooqta ah ku sugnaan doona Muqdisho muddada uu socdo heshiiska.

Shirkadaha daneynaya waxaa loogu baaqaya in ay Codsiga Muujinta Daneynta e-mail ahaan ugu soo gudbiyaan decastrom@un.org; njie-janneh@un.org ayna nuqulka e-mailka la wadaagaan unsoa-procurement@un.org ama gacan ahaan dukumiintiga u gudbiyaan cinwaanka hoos ku qoran. Codsiga Muujinta Daneynta waa in ay la socdaan, ugu yaraan, dukumeentiyada/macluumaadka soo socda:

1. Lambarka Diiwaangelinta ee Suuqa Caalamka ee Qaramada Midoobay (UNGM). Shirkadda waxaa shardi ah in ay u diiwaangashan tahay ganacsigan.
2. Macluumaadka Xiriirka ee Shirkadda: Magaca Shirkadda, Magaca Qofka lala xiriirayo, Lambarka UNGM, Cinwaanka Shirkadda, Lambarka Talefoonka, Lambarka Talefoonka Gacanta, iyo cinwaanka E-mail-ka oo Rasmi ah waa shardi in la qora.

Codisga Muujinta Daneynta uma dhigmo codsiga qandaraaska. UNSOS waxaa ay xaq u leedahay in ay beddesho ama gebi ahaanba joojiso shuruudaha xilliga ay doonto inta lagu gudo jiro hannaanka Muujinta Daneynta (EOI) iyo/ama hannaanka gudbinta codsiga qandaraaska. Jawaab oo laga bixiyo Codsiga Muujinta Daneynta ma aha mid si toos ah u xaqiijineyso in shirkadda la tixgelin doono oo loo soo diri doono dukumiintiga codsiga qandaraaska markii la soo saaro. Kaliya shikadaha oo kaddib markii qiimeyn hufan lagu sameeyo codsiyadooda Muujinta Daneynta (EOI) loo arko in ay yihiin kuwo tayo leh, ayaa loo diri doonaa dukumiintiga kama dambeyska ah ee codsiga qandaraaska.

Ku soo gudbi codsiga kor ku xusan baqshado afka ka daboolan, oo si cad lagu qoray “**Muujinta Daneynta adeegyada Wacyigelinta Bulshada, Maareynta Xafladaha iyo la Shaqeynta Bah-wadaagta**” (**Expression of Interest Community Outreach, Events Management and Partner Engagement services**) markii ay tahay ama ka hor **30-ka Maarso 2018-ka, Jimce 12-kii duhurnimo, wakhtiga Muqdisho (GMT+3)** adigoo ku soo diraya cinwaanka hoos ku xusan ama e-mail ahaan oo aad ku direysid decastrom@un.org; njie-janneh@un.org adigoo nuqul-ka e-mailka la wadaagaya unsoa-procurement@un.org,

Dadka daneynaya in ay soo diraan codsiyadooda waxaa ay Codsiga Muujinta Daneynta u soo gudbin karaan:

The Chief Procurement Officer (Sarkaalka Sare ee Iibsiga)
Re: **Muujinta Daneynta – adeegyada Wacyigelinta Bulshada, Maareynta Xafladaha iyo la Shaqeynta Bah-wadaagta (Expression of Interest – Community Outreach, Events Management and Partner Engagement services)**
UNSOS Procurement Section (Qaybta Iibsiga ee UNSOS)
Block E, Room E4 – E6
UNSOS Compound, Mogadishu, (Xarunta UNSOS, Muqdisho)
Federal Government of Somalia (Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya)
Tel: + 254 41 350 6161
Email address: njie-janneh@un.org; decastrom@un.org;
Nuqul u dir unsoa-procurement@un.org,

UNSOS waxaa ay ku dhiirigelinaysaa shirkadaha danaynaya in ay ku soo gubiyaan Codsigooda Muujinta Daneynta e-mail ahaan iyagoo ku soo diraya e-mail-lada kor ku xusan. Wixii su'aalo ah oo ku saabsan Codsiga Muujinta Daneynta (REOI) waxaa lagu toosin karaa decastrom@un.org; njie-janneh@un.org; iyada oo nuqul e-mail ah lala wadaagayo unsoa-procurement@un.org. Waad ku mahadsan tihiin sida joogta ah ee aad u daneysaan fursadaha iibsiga ee Qaramada Midoobay.